
# Wargeeska Badqabka Nadiifiyeyaasha



## Warar Ku Soo Kordhay Mashruuca: Xagaaga 2024

- Waxaan ku faraxsanahay inaan ku shaacino inaan hayno qabyo-qoraalka shaqeenaya oo ku saabsan Hagaha Isticmaalaha Xisaabiyaha (Calculator User Guide)- hage tallaabo-tallaabo ah oo loogu talagalay isticmaalka iyo fahamka Xisaabiyaha Culeyska Shaqada ee Ilaaliyayaasha Guryaha. Dukumeentigani waxa uu ka kooban yahay tafaasiil iyo qeexitaanno doorsoome kasta oo ku jira xisaabiyaha, macluumaadka ku saabsan qalabkee iyo hawshee kasta ee isku-dhafan ee jira, hagidda laga heli karo qeyb kasto oo bog aqoonsi isticmaale ah, tusaalooyin, iyo hagitaan xaddidan oo ku saabsan sida loo tafsiiro natiijooyinka. Fadlan iimayl noogu soo dir: CleanerStudy@Lni.wa.gov waxaana ku faraxsanaan doonaa inaan kuu soo dirno nuqul.
    - Kani waa dukumeenti qabyo qoraal ah oo keliya oo wali lama dhamaystirin ama aan si rasmi ah looma daabicin – waxa aanu filaynaa in aanu soo sii dayno nuqulka kama dambeeysta dabayaaqada sanadkan. Haddii aad jawaab celin qabto taas oo ku saabsan xisaabiyaha ama hagaha isticmaalaha, fadlan taas noo soo dir sidoo kale.

- Fadlan nagu soo biir si aan u soo dhaweyno khabiirkeena naqshadeeynta qalabka iyo sida ay u saameeyaan dadka iney si waxtar leh u shaqeeyaan ee cusub - Christina Garbuz. Christina waxay la shaqayn doontaa khubarada naqshadeeynta qalabka iyo sida ay u saameeyaan dadka iney si waxtar leh u shaqeeyaan ee CORE ah iyo kooxda qiimaynta culayska shaqada si ay nooga caawiso qiimaynta xisaabiyaha culayska shaqada, samaynta daraasadaha shaybaadhka iyo goobta, iyo curinta waxbarasho iyo agabka wacyigelin oo cusub si loogu ilaaliyo ilaaliyayaasha guryaha iyo nadiifiyayaasha WA si badbaado leh shaqada. Christina waxay ku soo kortay Spokane, WA, waxay ku hadashaa Af-Yukreen iyo Af-Ruush, waxayna dhawaan ka qalin jabisay Jaamacadda Gonzaga oo ay ka qaadatay Shahaadada Koowaad ee Jaamacada ee Seyniska ee Cilmi-nafsiga Aadanaha oo ayna ku sii takhasustay cilmi-nafsiga.

- Fadlan ogow: anagoo cusbooneysiinay agabkayaga iyo macluumaadkayaga xiriirka si aan ugu muujinno magacayaga cusub - lambarkeena taleefanka ee horeyba u sii jiray, websaydka, iyo iimaylka ayaa (JanitorStudy@Lni.wa.gov) wali sii ah kuwo shaqeenaya.

## Khatar: Kiimiko Wajahid

Arrintaan warsidaha ku jirta, waxaan sii wadeynaa inaan diirada saarno u beylah noqoshada kiimikada khatarta ah ee nadiifiyayaashu kula kulmaan goobta shaqada. Sahankayaga gobolka oo dhan ee ilaaliyayaasha guryaha (2019-2020) waxaa ku jiray su'aalo ku saabsan mowduucyo shaqo oo kala duwan, oo ay ku jiraan in haddii guryo ilaaliyeyaashu ay la kulmeen wax jidh


Washington State Department of Labor & Industries
Si aad macluumaad dheeri ah uga ogaato daraasada, wac ama fariin qoraal udir ama iimeel udir SHARP
360-819-7908 ▪ 1-888-667-4277 ▪ CleanerStudy@Lni.wa.gov
Nambarka Waxbixinta SHARP: 102-168-2024
SHARP Safety & Health Assessment & Research for Prevention

xajiimo ah oo ay sababtay u beylah noqoshada kiimikaad iyo in kale. Waxaa jiray 620 jawaabo oo dhamaystiran oo la siiyay sahanka. Kuwaas, 218 ka mid ah ilaaliyayaasha guryaha (35%) ayaa sheegay inay la kulmeen xajiimada jidhka taasoo ka dhalatay soo-gaadhista kiimikaad.

Waxaan waydiinay ilaaliyayaasha guryaha inay waligood kala kulmeen cuncun indhahooda, maqaarkooda, ama neefsashadooda (habka neefsashada) kiimikooyinka ay ku isticmaaleen goobta shaqada. Hadday haa ay dhaheen, waxay kula kulmeen cuncun ka timid kiimikooyinka gudaha goobta shaqada - waxay markaas qori karaan ilaa 10 nooc oo kiimikooyin gaar ah oo sababay cuncunka waxayna qeexi karaan inta jeer ee ay isticmaaleen alaabtan.

## Waxa aan ka ognahay kiimikooyinka ugu caansan ee u keenay xajiimada jidhka ilaaliyayaasha guryaha WA ee qaatay sahankeena:

**Kiimikooyinka ugu caansan ee keena cuncunka waxay ahaayeen:**




- 31% - 'Nadiifiyeyaasha' aan gaarka ahayn
- 17% - 'Warankiilo' (Sodium Hypochlorite) ama 'Koloriin'
- 9% - Nadiifiyeyaasha 'jeermis-dilayaasha ah'
    - Saddex meelood meel ka mid ah jeermis-dileyaasha (3% kiimikooyinka guud ee la soo sheegay) - waxa ku jiray Walaxda Isku-dhafka ah ee Quaternary Ammonium
- 6% - Nadiifiyeyaasha galaasyada
- 5% - Nadiifiyeyaasha tuunjiga saxarada ee musqulaha
- 4% - Nadiifiyeyaasha ujeedada guud ee guriga
- 3% - Shaanbooyinka saliid nadiifinta
- 3% - Nadiifiyeyaasha sagxadaha

- **Warankiilada** iyo **Jeermis-dilayaasha** ayaa ahaayeen ilaha ugu badan ee sababa cuncunka/xajiimada jidhka ee la aqoonsaday.
- Jeermis-dileyaal badan ayaa waxaa ku jira waxa loo yaqaan walxaha isku dhafan ee quaternary ammonium, kuwaasna waxay noqon karaan kuwo aad u sun ah in la neefsado ama la liqo.
  - Haddii aad ku heystao Walxaha Isku-dhafab ee Quaternary Ammonium goobtaada shaqada:
    - Dhammaan shaqaalaha waa in loo tababaraa sidii si badbaado leh loogu isticmaali lahaa looguna tuuri lahaa.
    - Qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed ee saxda ah (personal protective equipment, PPE) waa inuu ahaadaa mid la heli karo si loo ilaaliyo indhaha, sambabada, iyo maqaarka - nadiifiyayaashuna waa inay qaataan tababar ku saabsan sida loo isticmaalo PPE si ay uga caawiyaan ilaalinta naftooda.
    - Tan waxa ku jiri kara maaskaro, galoofyo, iyo/ama ilaalinta indhaha oo si fiican ula wada dhan. Beddel alaabadan haddii ay jeexjeexmaan ama jabaan. Akhri summada alaabta si aad u ogaato waxaad u baahan tahay.
    - Haddii ay suurtagal tahay, ku isticmaal jeermis-dilayaasha meelaha aadka u leh hawo soo gelida iyo ka bixitaanka ee fiican.
    - Yaree u beylah noqoshada kiimikooyinkan iyo/ama ka wada munaaqashooda beddelaad badbaado leh.
      - Tusaale ahaan, badeecooyinka kasbaday Shahaadada Nakhshadeynta Deegaanka (Design for the Environment, DfE) ee Hay'adda Ilaalinta Deegaanka (Environmental Protection Agency, EPA) ayaa waxaa lagu qiimeeyay saamaynta ay ku leeyihiin caafimaadka aadanaha.